

Soo celinta kalsoonida nidaamka socdaalka

Abriil 1, 2026

Dawladda Alberta waxay soo bandhigaysaa sharci lagu dhisayo kormeer gobol oo ballaaran oo ku saabsan socdaalka, lagula dagaallamayo khiyaanada, laguna soo celinayo kalsoonida nidaamka.

Maamul-u-waayidda dawladda federaalka ee socdaalka waxay keentay korodh dad oo aan la sii wadi karin, cadaadis saaran adeegyada dadweynaha iyo kiisas xadgudub ah oo ay geystaan dadka ujeedooyinka xun leh. Iyadoo taas laga jawaabay, dawladda Alberta waxay soo bandhigaysaa Hindise-sharciyeedka 26-aad, *Sharciga Kormeerka Socdaalka*, kaas oo xoojinaya kormeerka gobolka ee loo-shaqeeyayaasha, qorayaasha shaqaalaha ajnabiga ah iyo la-taliyayaasha socdaalka.

“Dadka reer Alberta waxay mudan yihiin inay ogaadaan in socdaalka Alberta uu yahay mid caddaalad ah, hufan, isla markaana ka jawaabaya baahiyaha dhabta ah ee xoogga shaqaalaha Alberta. Sharcigani wuxuu hagaajinayaa isla-xisaabtanka wuxuuna gobolka siinayaa xakameyn dheeraad ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo nidaamka socdaalka, wuxuuna na siinayaa agab ay gobollada kale isticmaalaan si loo hubiyo in nidaamku u shaqeynayo dadka reer Alberta.”

Joseph Schow, Wasiirka Shaqada, Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Socdaalka

Haddii la ansixiyo, *Sharciga Kormeerka Socdaalka* wuxuu ka doonayaa loo-shaqeeyayaasha inay iska diiwaangeliyaan gobolka ka hor intaysan helin barnaamijyada federaalka ee shaqaalaha ajnabiga ah ee ku-meel-gaarka ah. Sidoo kale, wuxuu dhisi doonaa nidaam shati-siin ah oo loogu talagalay la-taliyayaasha socdaalka iyo qorayaasha shaqaalaha ajnabiga ah, isagoo xoojinaya kormeerka, yareynaya khiyaanada, isla markaana hubinaya in kaliya ganacsiyada iyo la-taliyayaasha sharciga ah ee aqoonta u leh ay ka hawlgalaan Alberta.

Sharciga 26-aad wuxuu Alberta siinayaa agab horey uga jiray gobollada sida Saskatchewan iyo British Columbia. Diiwaangelin cusub oo loo sameeyo loo-shaqeeyayaasha iyo shatiga qorayaasha shaqaalaha iyo la-taliyayaasha ayaa:

- La dagaallami doona wax-is-daba-marinta iyo dhiig-miirashada, oo ay ku jiraan dalabyada shaqo ee been abuurka ah, khidmadaha sharci-darrada ah iyo matalaad khaldan.
- Suurtagelin doona dhaqangelin degdeg ah iyadoo loo marayo ciqaabo adag iyo agabka u hoggaansanaanta.
- Kordhin doona hufnaanta shaqaalaysiinta iyo in socdaalka si wanaagsan loola waafajiyo baahiyaha shaqo ee Alberta.

"Anigoo ah Guddoomiyaha Xarunta Alberta ee Joojinta Ka Ganacsiga Dadka, waxaan si kal iyo laab ah u taageerayaa Dawladda Alberta iyo Wasaaradda Shaqada, Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Socdaalka ee soo bandhigay *Sharciga Kormeerka Socdaalka*. Sharcigan muhiimka ah waa tallaabo

muhiim u ah ilaalinta dadka ku cusub dalka iyo shaqaalaha ajnabiga ah ee kumeel-gaarka ah si looga badbaadiyo dhiig-miirashada iyo in la carqaladeeyo ka ganacsiga shaqaalaha ee gobolkayaga. Iyadoo lala xisaabtamayo loo-shaqeeyayaasha, qorayaasha shaqaalaha iyo la-taliyayaasha, Alberta waxay diraysaa farriin cad oo ah in aan loo dulqaadan doonin si xun ula dhaqanka dadka nugul ee halkan u imaanaya inay shaqeeyaan."

Paul Brandt, guddoomiyaha, Xarunta Alberta ee Joojinta Ka Ganacsiga Dadka

Inta badan loo-shaqeeyayaasha, qorayaasha shaqaalaha iyo la-taliyayaasha socdaalka waxay raacaan xeerarka waxayna taageeraan dadka ku cusub dalka. Shuruudda diiwaangelinta iyo shatiga waxay kordhisaa hufnaanta, waxay ilaalisaa shaqaalaha nugul waxayna xoojisaa kalsoonida nidaamka.

Dawladda Alberta waxay qaadaysaa tallaabo ay ku hubinayso in socdaalku taageero dhaqaalaha gobolka, wax ka qabto daldaloolada shaqada iyo in la ilaaliyo dadka halkan u yimaada si ay u dhistaan nolol wanaagsan.

Xaqiiqooyinka degdega ah

- Socdaalku waa mas'uuliyad ay wadaagaan dawladda federaalka iyo tan gobolka
- Alberta hadda ma laha qaab-dhismeed keliya oo dhammaystiran oo lagula socdo loo-shaqeeyayaasha, qorayaasha shaqaalaha iyo la-taliyayaasha socdaalka ee ku lug leh shaqaalaysiinta muwaadiniinta ajaanibta ah.
- Hawlaha mamnuuca ah waxaa ka mid ah dalabyada shaqo ee been-abuurka ah, khidmadaha sharci-darrada ah iyo marin-habaabinta lala beegsado shaqaalaha ajaanibta ah.
- Sharciga la soo jeediyay wuxuu soo kordhin doonaa tallaabooyin fulineed, oo ay ka mid yihiin ganaaxyo, hakin liisan iyo mamnuucid laga mamnuucayo shaqaalaysiinta ama qorista shaqaalaha.
- Diiwaanka dadweynaha ayaa u oggolaan doona shaqaalaha iyo dadweynaha inay xaqiijiyaan in loo-shaqeeyayaasha, qorayaasha shaqaalaha iyo la-taliyayaasha loo oggol yahay inay ka hawlgalaan Alberta.

Macluumaadka la xidhiidha

<https://www.alberta.ca/strengthening-immigration-oversight>

Weydiimaha warbaahinta

Hunter Baril

hunter.baril@gov.ab.ca

780-619-5774

Xoghayaha Saxaafadda, Shaqooyinka, Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Socdaalka